

## Doorashada Koowaad ee Bulshada (Community First Choice)

### Guudmarka

Doorashada Koowaad ee Bulshada (Community First Choice) waa qorshaha gobolka ee Maamulka Naafonimada Koritaanka ee DSHS ee taageera shakhsiyaadka si ay ugu sii noolaadaan bulshada. Adeegyada waxaa loo fidiyaa carruurta ama dadka waaweyn ee jooga gurigooda, guri qoys qaangaar ah ama xarunta xannaaneynta waayeelka iyo naafada.

### Adeegyo

- **Daryeelka Shakhsiyeed** Caawimaadda hawlo maalmeedka sida qubeyska, dhar xirashada ama maareynta daawooyinka.
- **Daryeel Gargaar** Waxaa la adeegsan karaa haddii daryeelaha caadiga ah la waayo.
- **Xirfado Barasho** Tababbar lagu noqonayo qof aad ugu madaxbannaan hawlaha daryeelka shakhsiyeed ee maalinlaha ah.
- **Tiknoolajiyadda Dadka Caawisa** Aaladaha dadka ka caawin kara in ay si aad u madax-bananan u qabsadaan hawlaha daryeelka shakhsiyeed.
- **Nidaamka Wax-ka-qabashada Xaaladaha Degdegga ah ee Shakhsiga** Aalad elektaroonig ah oo ku xiran telefoon caawimaad u wacaya marka ay dhacdo xaalad degdeg ah.
- **Tababbarka Maareynta Daryeelaha** Baro in aad gacan ka geysato shaqaaleynta, maareynta iyo shaqo ka cayrinta daryeelayaasha.
- **Adeegyada Kala-guurka ee Bulshada** Waxay kaa caawinayaan ka guurista goobta hay'adeed ee la aqoonsan yahay marka aad u guurayso bulshada.
- **Xil-Wareejinta Kalkaalayaha Caafimadka** La-socoshada tababbarka iyo kalkaalinta loogu talagalay daryeelayaasha si ay hawlaha qaar guriga ugu qabtaan.

### Xaq-u-yeelashada

Shakhsiyadka:

- Macaamiisha DDA ah ama, haddii ay ka yar yihiin 18, ay leeyihiin naafonimo shaqo oo la aqoonsan yahay.
- Xaqa u leh Apple Health ama qorshaha kale ee dheefaha.
- Leh baahiyada daryeelka shakhsiyeed ee aan la haqabtirin iyadoo sabab u ah xadidaadyada shaqo ee naafonimada.
- Ka soo baxa daryeelka heer hay'adeed.
- Oggol in ay aqbalaan adeegyada guriga iyo bulshada ku saleysan beddelkii adeegyada hay'adeed.
- Ku nool gurigooda, xarunta xannaaneynta waayeelka iyo xaafada ama guriga qoyska qaangaarka



### Awoodda

Doorashada Koowaad ee Bulshada (Community First Choice) waa ikhtiyaarka qorshe gobol oo xaq loogu yeelanayo Medicaid oo uu sameeyay Xeerka Daryeelka La Awoodi Karo, si waafaqsan 1915(k) ee Xeerka Damaannada Bulshada. Waxaa maamula Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington.

**RCW 74.39A.400**, adeegyada daryeelka shakhsiyeed – ikhtiyaarka Doorashada Koowaad ee Bulshada (Community First Choice)

**Cutubka 388-106 WAC**, adeegyada daryeelka muddada-dheer



Washington State  
Department of Social  
& Health Services

Transforming lives

## Miisaaniyad

Qiyaastii 16,500 shakhsi oo ku qoran DDA ayaa hela taageero loo soo marsiinayo barnaamijka Doorashada Koowaad ee Bulshada (Community First Choice).

Kharashaadkan waxay ka gudbaan qaybo miisaaniyeed badan oo heerkan hadda lama soconno.

## Qiimayaasha

Adeegyada CFC ayaa waxaa bixiya adeeg bixiyeyaal kala duwan oo badan oo qandaraas lagu la jiro kuwaas oo qiimayaashooda ku xiran adeegga la bixiyay.

## Bah-wadaagta

- Shakhsiyadka adeegyada helaya.
- Qosyaska barnaamij ka-qaybqaatayaasha.
- Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS.
- Waaxda Carruurta, Dhallinyarada iyo Qoysaska.
- Jeegaanka Gobolka Washington
- Dadka Baara Cabashada DD.
- Xuquuqda Naafonimada ee Washington.
- Golaha Naafonimada koritaanka ee Gobolka Washington.
- Maamulka Daryeelka Caafimaad.
- Wargelinta Qoysaska.



## Kormeerka

### Dibadda

- Qaybta Adeegyada Daryeelka Degaanka ee AL TSA.
- Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid.
- Xafiiska Hantidhowraha Gobolka.
- Waaxda Caafimaadka Gobolka Washington.

### Gudaha

- Xafiiska Adeegyada iyo Barnaamijyada Tayada leh ee DDA.
- Xafiiska U-hoggaansamidda, Korjoogteynta iyo Tababbarka ee DDA.
- Qaybta Baaritaanka Gobolka oo Dhan ee DDA.

Xiriirka: **Suzan Halle**, Maamulaha Barnaamijka Community First Choice • [Suzan.Halle@dshs.wa.gov](mailto:Suzan.Halle@dshs.wa.gov) • 360-764-3561  
**Melissa Randles**, Maamulaha Qaybta Adeegyada Qorshaha Gobolka • [Melissa.Randles@dshs.wa.gov](mailto:Melissa.Randles@dshs.wa.gov) • 360-764-0405

Mareegtada DDA: <https://www.dshs.wa.gov/dda/>

Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington